- Bixinta Adeegyada Maaraynta Joogtaynta Yoolka waa ikhtiyaar u furan degmooyinka caymiska ku jira.
- Adeegyada Maaraynta Sugnaanta waa daawayn ku salaysan cadayn oo lagu daweeyo ciladaha marqaanka ayadoo macaamiisha u qalanta ay ka qaybgalaan adeegga Maaraynta Sugnaanta bukaan socodka oo nidaamsan oo socda 24 asbuuc, kaasoo lagu xijiyo lix bilood ama ka badan oo daaweynta dheeriga ah iyo adeegyada taageerada soo kabashada oo aan lahayn wax abaal marinno ah.
- Adeegyada hore ee Maaraynta Sugnaanta ee 12 asbuuc ah waxaa kamid ah abaal marinno lagu helaayo buuxinta yoolalka daawaynta, gaar ahaana inaan qofku isticmaalin wax balwad ah (tusaale, cocaine, amphetamine, iyo methamphetamine) kuwaasoo lagu xaqiijin doono baaritaannada kaadida. Abaal marinnada waxaa ku jira agab u dhigma qiimaha kaashka (tusaale, kaararka hadiyada).



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Adeegyada Maaraynta Sugnaanta waxaa keliya heli karaa macaamiisha helaaya adeegyada lagu baxsho goobaha aan dadku seexan ee uu maamulo adeeg bixiye caymiska ku jira kana diiwaan gashan kana qaybgala hanaanka daawaynta balaaran, ee gaarka ah.
- [Degmada] (waxaa ku jira xog kasta oo dheeri ah oo la xariirta cadadka, mudada, iyo baaxada gunnooyinka lagu heli karo Heshiiska si faahfaahsan si loo xaqiijiyo in macaamiishu ay fahmaan gunnooyinka ay xaq u leeyihiin)

Baaritaanka, qiimaynta Caawimaada Kooban iyo Ku Xirista Daawaynta

Baaritaanka, qiimaynta Caawimaada Kooban iyo Ku Xirista Daawaynta Khamriga iyo Daroogadu maaha gunno lagu baxsho Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal. Waa gunno lagu helo nidaamka Adeegga Caymiska Gaarka ah ee Medi-Cal iyo daryeelka agaasiman ee Medi-Cal ee macaamiisha jira 11 sano iyo ka wayn. Qorsheyaasha daryeelka Maaraysan waa inay baxshaan adeegyada isticmaalka maandooriyaasha ee caymisku daboolo, ayna ku jiraan baaritaanka isticmaalka khamrada iyo Daroogada, iyo ku xirista daawaynta (SABIRT) loona sameeyo macaamiisha da'aha 11 sano iyo ka wayn.

Adeegyada Caawimaada Xili Hore

Adeegyada caawimaada xili hore waxaa lagu daboolaa adeegga Nidaamka Adeeg Bixint Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee macaamiisha kayar 21 sano. Macmiil kasta oo kayar 21 sano kaasoo la baaray lana go'aanshay inuu khatar ugu jiro qaadista xanuunka balwada maandooriyaha ayaa heli kara adeeg kasta oo lagu daboolo heerka bukaan socodka ee adeegga oo ah adeegyada caawimaada xili hore. Baaritaanka isticmaalka Maandooriyaasha ayaan loo baahnayn si qofka loo siiyo adeegyada caawimaada hore ee macaamiisha kayar 21 sano.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah

https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Baaritaanka, Helida Cilada, iyo Daawaynta Xili Hore ee Goos-gooska ah

Macaamiisha kayar 21 sano ayaa u qalma inay helaan adeegyada horey loogu qeexay buug-gacmeedkaan iyo sidoo kale adeegyada dheeriga ah ee Medi-Cal ee lagu baxsho guuno loo yaqaano Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah.

Si uu ugu qalmo adeegyada Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah, macmiilku waa inuu kayar yahay 21 sano uuna helaa adeegyada daboolaaaya Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah ee buuxa kuwaasoo caafimaad ahaan muhiim u ah sixida ama xal u helida ciladaha iyo xanuunnada caafimaadka jirka iyo dhimirka. Adeegyada sugaaya, taageeraaya, kor u qaadaaya, ama ka dhigaaya xaalada mid la maarayn karo ayaa la tixgelinayaa si loo caawiyo xaalada waxaana lagu daboolayaa caymiska adeegyada Baaritaanka, Helida Cilada, iyo Daawaynta Xili hore ee Goos-gooska ah

Haddii aad su'aalo ka qabto adeegyada Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah, fadan wac [County to Insert Relevant Information Here ama booqo Webseedka Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah ee DHCS.

Adeegyada lagu baxsho Nidaamka Adeeg Bixinta ee DMC-ODS ayaa lagu heli karaa taleefanka ama caafimaadka khadka, marka laga reebo baaritaannada caafimaad ee Adeegyada Daawaynta Balwada iyo Maaraynta Xanuunka joojinta Balwada.

Adeegyada xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee laga heli karo Caymistada Daryeelka Maaraysan ama Barnaamijka "Adeegyada Caymiska Gaarka ah ee caadiga ah"



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Qorsheyaasha daryeelka Maaraysan waa inay baxshaan adeegyada isticmaalka maandooriyaasha ee caymisku daboolo, ayna ku jiraan baaritaanka isticmaalka khamrada iyo Daroogada, iyo ku xirista daawaynta (SABIRT) loona sameeyo macaamiisha da'aha 11 sano iyo ka wayn, ayna ku jirana haweenka uurka leh, xarumaha daryeelka guud iyo baaritaanka isticmaalka tubaakada, khamriga, iyo maandooriyaasha Qorsheyaasha Daryeelka Maaraysan sidoo kale waa inay baxshaan ama diyaarshaan adeegga Daawooyinka Daawaynta Balwada (oo sidoo kale loo yaqaano Daawaynta Daawada Lagu kaabo) ee lagu baxsho daryeelka guud, isbitaalka bukaan jiifka, waaxaha xaaladaha degdega ah, iyo xarumaha kale ee caafimaadka ee caymiska la shaqeeya. Qorsheyaasha Daryeelka Maaraysan sidoo kale waa inay baxshaan adeegyada xaalada degdega ah ee muhiimka u ah dejinta xaalada macmiilka, ayna ku jiraan adeegga bukaan jiifka ee ka saarida sunta jirka qofka.

Xog Dheeriga ah ee Gaarka u ah Degmada

Si aad u hesho qeexitaanka dhamaystiran ee adeegyada kor lagu sheegay kuwaasoo la heli karo iyo xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada la xariira xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha, fadlan wac Laynka Helitaanka iyo Gurmadka Masiibada (ACL) oo ah (888) 724-7240 (TTY: 711).



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

SIDA AAD KU HELAYSO ADEEDGYADA NIDAAMKA BIXINTA ADEEGGA NIDAAMSAN EE DAAWADA MEDI-CAL

Sidee ayaan Ku helayaa Adeegyada Nidaamka Adeegyada Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal?

Haddii aad aaminsan tahay inaad u baahan tahay adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha, wacaad ka heli kartaa adeegyada adoo wacaaya Laynka Helitaanka iyo Gurmadka Masiibada (ACL) oo ah (888) 724-7240 (TTY: 711). Waxaa sidoo kale lagugu xiri karaa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada si aad ugu hesho adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha qaabab kale.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa laga doonayaa inuu aqbalo dadka ay adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha usoo gudbiyaan dhakhaatiirta iyo adeeg bixiyaasha kale ee daryeelka guud kuwaasoo aaminsan inay u baahan yihiin dadku adeegyadaan iyo kuwa ka yimaada caymiskaaga daryeelka caafimaadka maaraysan ee Medi-Cal, haddii aad macmiil u tahay. Caadiyan, adeeg bixiyahaan ama qorshaha daryeelka maaraysan ee Medi-Cal ayaa u baahan doona ogolaanshahaaga ama kan waalidkaaga ama daryeelaka ilmaha si ay ugu gudbiyaan adeegga, ilaa in ay xaalad degdeg ah jirto maahee. Dadka iyo ururada kale ayaa sidoo kale dadka usoo gudbin kara adeegga degmada, ayna ku jiraan dugsiyada; waaxaha faya dhawrka ama adeegyada bulshada ee degmada; ilaaliyaasha, waalidiinta ama xubnaha qoyska; iyo wakaaladaha booliiska.

Adeegyada caymisku daboolaayo ayaa laga heli karaa shabakada adeeg bixiyaasha ee Ismaamulka San Diego. Haddii dhakhtar qandaraas kula jira uu diido fulinta ama haddii kale taageerida adeeg caymisku daboolaayo, Ismaamulka San Diego ayaa diyaarinaaya dhakhtar kale ee bixiya adeegga. Ismaamulka San Diego ayaa ka jawaabi



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

doona soo gudbinnada waqtiga ku haboon iyo isku dubaridka haddii adeegga caymiska uusan bixin dhakhtar sabab la xariirta xadidaado diimeed, kuwo hufnaan, ama dhanka mooraalka ah oo ku aadan adeegga caymisku daboolo. Degmadaada ayaa diidi karta codsiga samaynta qiimaynta hore si loo go'aansho inaad buuxinayso iyo in kale shuruudaha helitaanka adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada.

Ismaamulka San Diego oo ah degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa laga doonayaa inay u ogolaato macmiilka inuu sii wato helitaanka adeegyada caymisku daboolo ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal oo uu ka helo dhakhtar caymiska ka baxsan marka qiimayntu go'aamiso in, haddii aan adeegyada loosii wadin, in ay kasii darayso xaalada caafimaadka macmiilku ama uu khatar u galaayo in isbitaal la dhigo ama run daawayn la seexsho.

Adeegyada daawaynta ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal oo uu baxsho dhakhtar horey u waday ayaa sii socon doona ugu badnaan sagaashan (90) maalmood ilaa in muhiimad caafimaad ay qasab ka dhigayso maahee in adeegyada lasii wado muddo intaas ka badan, oo aan ka badnayn 12 bilood. Ismaamulka San Diego oo ah Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa siin doonta macmiilka ka guurista daryeelka uu bixin jiray dhakhtar ka baxsan caymiska marka dhammaan shuruudaha soo socda la buuxsho:

1. Degmadu ay go'aamiso asagoo adeegsanaaya qiimayn in u wareejinta macmiil dhakhtar cusub ay keenaysa in uu aad u sii xumaado caafimaadka macmiilku, ama ay keenayso khatarta ah in isbitaal la dhigo ama la seexsho xarun;
2. Degmadu ay awoodo inay go'aamiso in macmiilku uu xariir jira la leeyahay dhakhtarka ka baxsan shabakada (in qofku sheegto keliya kuma filna cadaynta xariirka qofku la leeyahay dhakhtar);



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- a. Xariir jira waxaa laga wadaa in macmiilku uu daawaynta ka helaayay dhakhtarka ka baxsan caymiska kahor taariikhda uu u adeegaayo DMC-ODS ka Degmada.
3. Dhakhtarka ka baxsan caymiska uu doonaayo inuu aqbalo heerarka sareeya ee qiimaha heshiiska Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamka ee Caymiska Daawada Medi-Cal ee Ismaamulka San Diego ama qiimeyaasha Daawada Medi-Cal ee adeegyada ay qusayso ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamka ee Caymiska Daawada Medi-Cal;
4. Dhakhtarka ka baxsan caymisku uu buuxsho heerarka xirfada ee uu u baahan yahay Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamka ee Caymiska Daawada Medi-Cal ee Ismaamulka San Diego uusan soo marin cilado dhanka xirfada ah oo u diidaaya shaqadaan (cilad dhanka tayada daryeelka ah waxaa laga wadaa in Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamka ee Caymiska Daawada Medi-Cal ee Ismaamulka San Diego uu qoro ciladaha tayada daryeelka ilaa heer dhakhtarku uusan u qalmi karin bixinta adeegyada cid kamid ah macaamiisha Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal);
5. Dhakhtarka la xaqiijiyo inuu haysto shahaadada Caymiska Dawada ee Medi-Cal; iyo
6. Dhakhtarka ka baxsan caymiska uuu keeno Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamka ee Caymiska Daawada Medi-Cal dhammaan xogta la xariirta daawaynta, si loogu adeegsado go'aaminta muhiimada caafimaadka iyo abuurista qorshaha hadda ee daawaynta, ilaa iyo inta ay waafaqsan tahay sharciyada iyo xeerarka sirta qofka ee federaalka iyo gobalka. Waxaa intaas dheer, dhakhtarku wa ainuu u keeno Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamka ee Caymiska Daawada Medi-Cal ee Ismaamulka San Diego dhammaan xogta natiijooyinka la gaaro.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Xagee ayaan Ka helayaa Adeegyada Nidaamka Adeegyada Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal?

Ismaamulka San Diego ayaa ka qaybgasha barnaamijka Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamka ee Caymiska Daawada Medi-Cal. Maadaama aad dagan tahay Ismaamulka San Diego, waxaad ka helayso Adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal gudaha Ismaamulka San Diego adoo ka helaaya Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamka ee Caymiska Daawada Medi-Cal ee Ismaamulka San Diego ee degmada ayaa leh dhakhaatiirta daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha oo u diyaarsan daawaynta xanuunnada caymisku daboolaa. Degmooyinka kale ee ana ka qaybgelin Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa bixin kara adeegyada soo socda ee Daawada Medi-Cal:

- Daawaynta Bukaanku Socodka
- Daawaynta Maandooriyaha
- Daawaynta Naltrexone
- Daawaynta Bukaanku Socodka oo Adag
- Adeegga Daawaynta Maandooriyaha ee Hooyada oo lagu Baxsho Hooyga (marka laga reebo qolka iyo boorka)

Haddii aad ka yar tahay 21 sano, waxaad sidoo kale u qalantaa adeegyada Baaritaanka, Helida cilada, iyo Daawaynta Xili Hore ee Goos-gooska ah ee lagu baxsho degmo kale gobalka oo dhan.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Daryeelka Kadib Saacadaha Shaqada

Haddii aad u baahan tahay adeegyada kadib saacadaha shaqada ama maalmaha fasaxa asbuuca, wacaad ka wici karta Laynka Helitaanka iyo Gurmada Masiibada (ACL) oo ah (888) 724-7240 (TTY: 711) si aad u ogaato haddii dhakhtarka daawaynta la heli karo si uu markaba kuu caawiyo. Hase yeeshee, inta badan adeeg bixiyaasha daawaynta bukaan socodka iyo hooyga ayaan qaban bukaanno cusub xiliyada fiidkii ama maalmaha fasaxa asbuuca. Haddii aad hadda hesho adeegyada daawaynta, waxaad la hadli kartaa dhakhtarka ku daaweeya si aad xog badan uga ogaato marka shaqaaluhu ay kuu adeegi karaan kadib saacadaha shaqada.

Sidee ayaan ku ogaanayaa Marka aan u Baahan nahay Caawimaad?

Dad badan ayaa waajahaaya waqtiyo adag noloshooda waxayna waajihi karaan dhibaatooyin xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha. Waxa ugu muhiimsan inaad xasuusnaato waa in aad caawimaad helayso. Haddii aad u qalanto Medi-Cal, waxaadna aaminsan tahay inaad u baahan tahay caawimaad xirfadeed, waa inaad codsataa qiimayn aad ka hesho Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada si loo hubiyo si dhab ah maadaama aad hadda dagan tahay degmo bixisa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal.

Sidee Ayaan ku ogaanayaa Marka Cunugaygu u Baahan yahay Caawimaad?

Waxaad la xariiri kartaa degmada ka qaybgalaysa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal si ay qiimayn ugu samayso cunugaaga ama kuraygaaga haddii aad isleedahay wuxuu leeyahay astaamaha xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha. Haddii cunugaaga ama kuraygaagu u qalmo Medi-Cal qiimaynta degmaduna muujiyo in adeegyada daawaynta daroogada iyo khamriga ee ay degmadu



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

daboolayso loo baahan yahay, degmada ayaa u diyaarin doona cunugaaga ama kuraygaaga helitaanka adeegyada.

Goorma ayaan Helayaa Adeegyada Nidaamka Adeegyada Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee Degmada?

Caymiskaaga Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada waa inuu buuxshaa heerarka waqtiga balanta ee gobalka marka uu mudaynaayo balantaada si aad u hesho adeegyada ay bixiso Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada. Nidaamka Adeegyada Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu waa inuu ku siiyaa balan waafaqsan heerarka waqtiga balanta ee soo socda:

- 10 maalmood gudahood laga bilaabo marka aad dirto codsigaaga aan degdega ahayn ee bilaabista adeegyada dhakhtarka xanuunka maandooriyaha ee adeegyada bukaan socodka, adeegyada adag ee bukaan socodka, iyo adeegyada hooyga;
- 3 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood kadib codsiga adeegyada Barnaamijka Daawaynta Maandooriyaha;
- 48 saacadood gudahood marka aad dirto codsiga daryeelka degdega ah; daryeel degdeg ah ayaa lagu qeexaa xaalad uu macmiilku u arko mid daran, laakiin aan nafta khatar gelinayn. Xaalad dhibaato ku keenaysa shaqooyinka caadiga ah ee nolol maalmeedka una baahan qiimayn uu sameeyo dhakhtar iyo haddii ay muhiim tahay, daawayn la sameeyo 48 saacadood.
- Balanta dabalgalka ah oo la qabto 10 maalmood gudahood haddii aad ku jirto koorsada daawaynta xanuunka maandooriyaasha oo taagan, marka laga reebo xaalado gaar ah oo dhakhtarka daawayntu sheego.

Yaa go'aaminaaya Adeegyada aan Helaayo?



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Adiga, dhakhtarkaaga, iyo Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa dhammaan door ka qaadanaaya go'aaminta adeegyada aad u baahan tahay inaad ka hesho Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada. Dhakhtarka xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ayaa kula hadli doona, kadibna markuu qiimayn ku sameeyo wuxuu kaa caawin doonaa go'aaminta adeegyada kugu haboon ayadoo laga eegaayo baahiyahaaga.

Dhakhtarka xanuunka maandooriyaasha ayaa qiimayn doona inaad qabto iyo inkale xanuunka maandooriyaha iyo adeegyada ugu haboon baahiyahaaga. Waxaad awoodi doontaa inaad hesho adeegyada aad u baahan tahay inta dhakhtarkaagu samaynaayo qiimayntaan.

Haddii aad ka yar tahay 21 sano jir, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu waa inuu baxshaa adeegyada caafimaad ahaan Muhiimka ah ee kaa caawinaaya sixida ama kor u qaadista xaaladaada caafimaadka dhimirka Adeegyada joogtaynaaya, taageeraaya, kor u qaadaaya, ama dejinaaya xaalada xanuunka habdhaqanka ayaa loo arkaa kuwo caafimaad ahaan muhiim ah.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

SIDA AAD KU HELAYSO ADEEGYADA CAAFIMAADKA DHIMIRKA

Xagee ayaan Ka helayaa Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah?

Waxaad adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ka helayso degmada aad dagan tahay. Si aad u hesho xog dheeraad ah ama aad u hesho gudbin, waxaad la xariiri kartaa Laynka Helitaanka iyo Masiibada (ACL) oo ah (888) 724-7240 (TTY: 711). Degmo kasta waxay leedahay adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee carruurta, dhalinta, dadka waawayn, iyo waayeelka. Haddii aad ka yar tahay 21 sano, waxaad u qalantaa adeegyada Baaritaanka, Helida cilada, iyo Daawaynta Xili Hore ee Goos-gooska ah, kaasoo ay ku jiri karaan caymiska iyo gunnooyinka dheeriga ah.

Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa go'aamin doona haddii aad buuxisay shardiga helitaanka adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah. Haddii aad buuxiso, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa kugu xiri doona dhakhtarka caafimaadka dhimirka kaasoo ku baari doona si loo go'aansho noocyada adeegyada aad u baahan tahay. Waxaad sidoo kale codsan kartaa qiimayn aad ka helayso caymiskaaga daryeelka maaraysan haddii aad tahay macmiil. Haddii caymiska daryeelka maaraysan uu go'aansho inaad buuxisay shuruudaha helitanaka adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah, qorshaha daryeelka Maaraysan ayaa kaa caawin doona gaarista helitaanka adeegyada caafimaadka dhimirka oo aad ku helayso caymiska caafimaadka dhimirka. Ma jirto albaab ay khalad tahay inaad ku hesho caafimaadka dhimirka.

Waa maxay Shuruudaha Helitaanka Caymiska Adeegyada Daawaynta Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaasha?

Ayadoo qayb ka ah go'aaminta haddii aad u baahan tahay adeegyada daawaynta isticmaalka maandooriyaha, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa kaala shaqayn doona adiga iyo dhakhtarkaaga go'aaminta haddii



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah

https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

aad buuxinayso shuruudaha helitaanka adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal. Qaybtaan waxay sharxaysaa sida degmadaada caymiska ku jirta ay u gaarayso go'aankaas.

Dhakhtarkaaga ayaa kaala shaqayn doona samaynta qiimayn lagu go'aaminaayo noocyada adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee kuugu haboon. Qiimayntaan waa in lagu sameeyaa si fool-ka fool ah, taleefanka caafimaadka, ama taleefanka. Waxaad heli kartaa qaar kamid ah adeegyada inta la wado qiimaynta. Kadib marka dhakhtarkaagu sameeyo qiimaynta, wuxuu go'aamin doonaa haddii aad buuxinayso shuruudaha soo socda ee helitaanka si aad u hesho adeegyada lagu baxsho Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal:

- Waa inaad ka diiwaan gashan tahay Medi-Cal.
- Waa inaad dagan tahay degmo qayb ka ah Nidaamka Bixinta Adeegga nidaamksan ee Daawada Medi-Cal.
- Waa in in lagaa helaa ugu yaraan hal xanuun oo kamid ah Xanuunnada ku jira Liiska Tasmada Baaritaanka iyo Tira Koobka Xanuunnada Dhimirka ee Xanuunka ka dhasha Maandooriyaha iyo Balwada (marka laga reebo Xanuunnada la Xariira Tubaakada iyo Xanuunnada Aan ahayn kuwa Maandooriyaha) ama aad qabtay ugu yaraan hal kamid ah liiska Xanuunnada Baaritaanka iyo Tirakoobka ee Dhimirka ee xanuunnada Maandooriyaha iyo Balwada kahor intaan lagu xirin ama intii lagu jiray kadib (marka laga reebo Xanuunnada la Xariira Tubaakada iyo Xanuunnada Aan ahayn kuwa Maandooriyaha).

Macaamiisha kayar 21 sano ayaa u qalma inay helaan dhammaan adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal marka ay buuxshaan shuruudaha muhiimada caafimaadka ee Baaritaanka, Helida cilada, iyo Daawaynta Xili



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Hore ee Goos-gooska ah ayadoo aan laga eegayn degmada ay dagan yihiin aana laga eegayn shardiga ah inay xanuunka qabaan ee kor lagu sheegay.

Waa maxay Muhiimada Caafimaad?

Adeegyada aad hesho waa inay yihiin kuwo caafimaad ahaan muhiim ah ayna ku haboon yihiin xalinta xanuunkaaga. Dadka jira 21 sano iyo ka wayn, adeegga ayaa caafimaad ahaan muhiim ah marka uu yahay mid macquul ah muhiimna u ah difaaca noloshaada, kahortaga xanuun daran ama naafo, kor u qaadaaya xanuunkaaga. Macaamiisha kayar da'da 21 sano, adeegga ayaa caafimaad ahaan muhiim ah haddii adeegu saxaayo ama ka caawinaayo joojinta isticmaalka maandooriyaha ama xanuunka balwada. Adeegyada sugaaya, taageera, kor u qaadaaya, ama ka dhigaaya mid la xakamayn karo isticmaalka Maandooriyaasha ama xanuunka balwada ayaa la tixgelinayaa si loo caawiyo xaalada sidaas awgeedna waxaa lagu daboolayaa caymiska adeegyada Baaritaanka, Helida Cilada, iyo Daawaynta Xili hore ee Goos-gooska ah.

Xog Dheeriga ah ee Gaarka u ah Degmada

Geli xogta u gaarka ah Degmada halkaan [hadday jirto].



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

DHAKHTARKA QAYBTA A

Sidee ayaan Ku helayaa Dhakhtar i siiya Adeegyada Daawaynta Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaasha ee aan U baahan Nahay?

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa xadiyo ku xiri kara dookhyadaada dhakhaatiirta. Waxaad codsan kartaa in Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadaada uu ku siiyo dookha koobaad ee dhakhaatiirta. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal waa inuu sidoo kale kuu ogolaado inaad badesho dhakhaatiirta. Haddii aad codsato inaad badesho dhakhtarkaaga, degmadu waa inay kuu ogolaataa inaad kala doorato ugu yaraan labo dhakhtar ilaa heerka ugu macquulsan.

Degmadaada ayaa laga doonayaa inay soo daabacdo liiska dhakhtarada hadda ka tirsan ee oonlaynka ah. Haddii aad su'aalo ka qabto dhakhaatiirta hadda ama aad doonayso liiska cusub ee diiwaanka dhakhaatiirta, booqo webseedka degmadaada oo ah:

https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html

ama wac Laynka bilaashka lagu waco ee Ismaamulka San Diego ee Helitaanka iyo Masiibada (ACL) oo aad ka helayso (888)724-7240 (TTY: 711). Liiska diiwaanka dhakhtarka hadda ayaad oonlayn ahaan uga haysaa webseedka degmada, ama asagoo waraaq ah markaad codsato.

Mararka qaar dhakhtarada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa doorta inay joojiyaan bixinta adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal asagoo ah dhakhtar adeeg siiya degmada, joojiya heshiiska kala dhexeeya Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada, ama joojiya inuu aqbalo bukaannada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah

https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

ee Daawada Medi-Cal si iskood ah ama marka uu ka codsado Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu. Marka sidaan dhacdo, Nidaamka Bixinta Adeegga Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu waa inuu sameeyaa dedaal daacadnimo leh si uu ogeysiiska qoran ee joojinta adeegga uu baxsho dhakhtarka degmadu qandaraaska kula jirto siiso 15 maalmood gudahood kadib marka uu soo gaaro ogeysiiska joojinta adeegga, ayna siiso qof kasta oo adeegyada daawaynta maandooriyaha ka hela dhakhtarka.

Shaqsiyaadka Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alasaka ee u qalma adeegyada Medi-Cal kuna nool degmooyinka ka tirsan Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada, ayaa heli kara adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo ay baxshaan Dhakhaatiirta Caafimaadka Hindida ee haysta shahaadada Drug Medi-Cal ee muhiimka ah.

Marka aan Helo Dhakhtar, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee Degmadu Ma u Sheegi karaa Dhakhtarka Adeegyada aan Helaayo?

Adiga, dhakhtarkaaga, iyo Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa dhammaan door ka qaadanaaya go'aaminta adeegyada aad u baahan tahay inaad ka hesho degmada adoo raacaaya shuruudaha helitaanka ee adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal. Mararka qaar degmada ayaa go'aanka u dhaafaysa adiga iyo dhakhtarka. Marar kale, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa ka dooni kara dhakhtarkaaga inuu keeno sababaha dhakhtarku u aaminsan yahay inaad u baahan tahay adeegga kahor intaan adeegga la bixin. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal waa inuu adeegsadaa xirfadle khibrad u leh si uu dib u eegis u sameeyo.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Nidaamkaan dib u eegista waxaa loogu yeeraa hanaanka xaqiijinta qorshaha. Xaqiijinta xili hore ee adeegyada qasab maaha marka laga reebo adeegyada hooyga iyo bukaan jiifka (marka laga reebo adeegyada maaraynta Ciladaha joojinta Balwada). Hanaanka ogolaanshaha degmada ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal waa inuu raacaan jadwallo gaar ah. Ogolaanshaha caadiga ah, caymisku waa inuu go'aan ka gaaraa codsiga dhakhtarkaaga 14 maalmood gudahood.

Haddii adiga ama dhakhtarkaagu codsado, ama haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu aaminsan yahay in maslaxadaadu ku jirto si loo helo xog dheeri ah oo uu baxsho dhakhtarkaagu, jadwalka ayaa la kordhin karaa 14 maalmood oo dheeraad ah. Tusaalaha marka waqti kordhintu ay noqon karto maslaxadaada waa marka degmadu aaminsan tahay inay awoodo inay ansixiso codsiga dhakhtarkaaga ee ogolaanshaha haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu xog dheeri ah ka helo dhakhtarkaaga uuna ku qasban yahay inuu diido codsiga haddii aan xogtaas la keenin. Haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada uu kordhiyo waqtiga, degmada ayaa kuusoo diraysa ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan muddo kordhinta.

Haddii aan degmadu go'aan ku gaarin mudada caadiga ah ee loo cayimay ama codsiga ogolaanshaha degdega ah, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal waa inuu kuusoo diraa Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada kaasoo kuu sheegaaya in adeegyada la diiday iyo in aad racfaan soo gudbin karto ama codsan karto Dhagaysiga Gobalka.

Waxaad ka codsan kartaa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal xog dheeraad ah oo ku saabsan hanaankooda ogolaanshaha.

Haddii aadan waafaqin go'aanka Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu ka gaaray hanaanka ogolaanshaha, waxaad racfaan u gudbin



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

kartaa degmada ama waxaad codsan kartaa Dhageysiga Gobalka. Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri qaybta Xalinta Dhibaataada.

Waa kuwee Dhakhaatiirta Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee Degmadaydu Adeegsado?

Haddii aad ku cusub tahay Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada, liiska buuxa ee adeeg bixiyaasha Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadaada ayaa laga heli karaa

https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html

waxaana ku jira xog ku saabsan meesha ay joogaan adeeg bixiyaashu, adeegyada daawaynta isticmaalka Maandooriyaasha ee ay baxshaan, iyo xogta kale ee kaa caawinaysa helitanaka daryeelka, ayna ku jirto xog ku saabsan adeegyada dhaqanka iyo luuqada oo laga heli karo dhakhaatiirta. Haddii aad su'aalo ka qabto dhakhaatiirta, wac lambarka bilaashka ah ee degmada oo ku qoran qaybta ugu horeysa buug-gacmeedkaan.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

OGEYSIISKA GO'AANKA DIIDMADA GUNNADA

Waa maxay Xuquuqda aan Leeyahay haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal Diido Adeegyada aan Doonaayo ama Aan aaminsan Nahay inaan U baahan Nahay?

Haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadaadu diido, xadido, yareeyo, dib u dhigo ama joojiyo adeegyada aad doonayso ama aaminsan tahay inaad xaq u leedahay, waxaad xaq u leedahay Ogeysiis (loo yaqanao "Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada") oo ka imaanaaya Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee Degmada. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad diido go'aanka adoo codsanaaya racdaan. Qaybaha hoose ayaa ka hadlaaya xuquuqdaada Ogeysiiska iyo waxa aad samayn karto haddii aad diido go'aanka Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal.

Waa Maxay Go'aanka Diidmada Gunnadu?

Go'aanka Diidmada Gunnada ayaa lagu qeexaa wax kamid ah talaabooyinka soo socda ee uu qaado Nidaamka Adeegyada Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada:

1. Diidmada ama xadidida ogolaanshaha adeegga la codsaday, ayna ku jiraan go'aannada lagu saleeyay nooca ama heerka adeegga, muhiimada caafimaadka, haboonaanta, goobta, ama waxtarka adeegga la daboolaaayo;
2. Yaraynta, hakinta, ama joojinta adeeg horey loo ogolaaday;
3. Diidmada, si guud ama qayb ahaan, lacagta adeegga;
4. Fashilka bixinta adeegyada oo lagu baxsho qaab ku haboon waxtiga;
5. Ku fashilmida ku hawlgelida jadwalka loo asteeyay si loo gaaro xal guud oo ku aadan cabashooyinka iyo racfaannada (haddii aad cabasho u gudbiso Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal kadibna uusan Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal kugusoo celin go'aanka



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

qoraalka ah oo ku aadan cabashadaada 90 maalmood gudahood. Haddii aad racfaan u gudbisay Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal kadibna uusan Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal go'aanka qoraalka ah kaa siin racfaankaaga 30 maalmood gudahood, ama haddii aad gudbisay racfaan degdeg ah, aadana helin jawaab 72 saacadood gudahood); ama

6. Diidmada codsiga macmiilka ee diidista masuuliyada dhaqaale.

Waa Maxay Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnadu?

Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnadu waa waraaq Nidaamkaaga Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal uu kuusoo diri doono haddii uu gaaro go'aan uu ku diidaayo, ku xadidaayo, ku yareynaayo, dib ugu dhigaayo, ama uu ku joojinaayo adeegyada aad adiga iyo dhakhtarkaagu aaminsan tihii inaad xaq u leedahay. Tan waxaa ku jira diidmada qarashka adeegga, diidmo ku saleysan sheegashada ah inaan adeegyada caymisku daboolin, ama diidmo ku salaysan in adeeggu uu la xariiro nidaamka adeeg bixinta oo khaldan, ama diidmada codsiga dood ku aadan masuuliyada dhaqaale. Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada ayaa sidoo kale loo adeegsadaa in lagugu wargeliyo haddii cabashadaada, racfaankaaga, ama racfaankaaga degdega ah aan xal laga gaarin waqtigii la rabay, ama haddii aadan ku helin adeegyada mudada loo cayimay in Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu ku baxsho adeegyada. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada ee qoran.

Waqtiga Ogeysiiska

Caymisku waa inuu ogeysiiska boostada ugu diraa macmiilka ugu yaraan 10 maalmood kahor taariikhda talaabada joojinta, hakinta, ama yaraynta adeegga Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ee ee horey loo ogolaaday.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Caymisku waa inuu sidoo kale boostada ugu diraa macmiilka ogeysiiska labo maalmood gudahood marka uu soo baxo go'aanka diidmada lacag bixinta ama go'aannada ka dhashay diidmada, dib u dhigista, ama wax ka badelka dhammaan ama qayb kamid ah adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal. Haddii aad hesho Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada kadib marka aad horey u heshay adeegga lagaama rabo inaad bixiso qarashka adeegga.

Markasta Miyaan Heli Doonaa Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada Marka aanan Helin Adeegga aan Rabay?

Haa, waa inaad heshaa Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada. Hase yeeshee, haddii aadan helin ogeysiis, waxaad racfaan u gudbin kartaa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ama haddii aad dhamaystirtay hanaanka racfaanka, waxaad codsan kartaa Dhageysiga Gobalka. Marka aad la xariirto degmada, sheeg in lagu diiday gunnada laakiin aan lagu siin ogeysiis. Xog ku aadan sida loo gudbiyo racfaan ama codsiga Dhageysiga Gobalka ayaa ku qoran buug-gacmeedkaan. Xogta ayaa sidoo kale laga heli karaa xafiiska dhakhtarkaaga.

Muxuu li Sheegi Doonaa Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnadu?

Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada ayaa kuu sheegi doona:

- Waxa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmadu sameeyay kaasoo saamaynaaya adiga iyo awoodaada helitaanka adeegyada.
- Taariikhda uu dhaqan galaayo go'aanku iyo sababta caymisku u gaaray go'aanka.
- Xeerarka gobalka ama federaalka ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu raacday markii ay gaaraysay go'aanka.
- Waxa ay noqonayso xuquuqdaadu haddii aadan aqbalin go'aanka caymiska.
- Sida aad racfaan ugu gudbin karto caymiska.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Sida loo codsado Dhageysiga Gobalka.
- Sida aad u codsan karto racfaan degdeg go'aan looga gaaro ama Dhageysiga Gobalka ee degdega ah.
- Sida aad ku helayso caawimaad la xariirta gudbinta racfaan ama codsashada Dhageysiga Gobalka.
- Mudada aad haysato si aad u gudbiso racfaan ama u codsato Dhageysiga Gobalka.
- Xuquuqda aad u leedahay inaad adeegyada sii hesho inta aad sugayso go'aanka laga gaaro Racfaanka ama Dhageysiga Gobalka, sida loo codsado sii wadista adeegyada, iyo haddii qarashaadka adeegyadaan ay daboolayso Medi-Cal.
- Marka ay tahay inaad gudbiso codsiga Racfaanka ama Dhageysiga Gobalka haddii aad doonayso in adeegyada laguusii wado.

Maxaan Samaynayaa Marka aan Helo Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnadu?

Marka aad hesho Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada, waa inaad akhridaa dhammaan xogta ku qoran ogeysiiska si taxadar leh. Haddii aadan fahmin ogeysiiska, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa ku caawin kara. Waxaad sidoo kale codsan kartaa qof kale inuu ku caawiyo.

Waxaad codsan kartaa sii wadista adeegga lagaa joojiyay marka aad gudbiso racfaan ama aad codsato Dhageysiga Gobalka. Waa inaad codsataa in lagu sii wado adeegyada ugu danbayn 10 maalmood kadib taariikhda Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada lagusoo diro boostada ama toos lagu siiyo, ama kahor taariikhda dhaqan galka isbadelka.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

HANAANKA XALINTA DHIBAATADA

Ka waran Haddii aan Helin Adeegyada Aan ka doonaayo Caymiskayga Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal?

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa leh qaab uu kaala shaqeeyo xalinta caqabada la xariira arin qusaysa adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee aad hesho. Kan waxaa loo yaqaanaa hanaanka xalinta caqabadaha waxaana ku jiri kara hanaannada soo socda.

1. **Hanaanka Cabashada** – waa muujinta diidmo ku aadan wax la xariira adeegyadaada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha, marka laga reebo Ogeysiiska Diimada Gunnada.
2. **Hanaanka Racfaanka** – dib u eegista go'aan (diidmada, joojinta, ama yareynta adeegyada) kaasoo laga gaaray adeegyadaada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha uuna gaaray caymiskaaga Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ama dhakhtarkaaga.
3. **Hanaanka Dhageysiga Gobalka** – dib u eegis la sameeyo si loo xaqiijiyo inaad hesho adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee aad xaq u leedahay inaad ka hesho barnaamijka Medi-Cal.

Gudbinta cabasho ama racfaan, ama codsashada Dhageysiga Gobalka ayaan lagu adeegsan karin mana saamayn doonaan adeegyada aad helayso. Marka aad dhamystirto cabashadaada ama racfaanka, degmada caymiskaaga Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa kuu sheegaysa adiga iyo dadka kale ee ay qusayso natijada kama danbaysta ah. Marka la dhamaystiro Dhageysiga Gobalka, Xafiiska Dhageysiga Gobalka ayaa kuu sheegi doona adiga iyo dhakhtarka natijada kama danbaysta ah.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Xog badan ka ogoow hanaan kasta oo xalinta caqabadaha ah oo hoos ku qoran.

Maan Heli karaa Caawimaad Ku aadan Gudbinta Racfaan, Cabasho, ama Dhageysiga Gobalka?

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadaada ayaa ku siinaaya dadka kuu sharxa hanaanadaan kaana caawinaaya inaad soo sheegto wixii cilad ah oo kaa qabsata mid kasta cabashada, racfaanka, ama codsiga Dhageysiga Gobalka. Waxay sidoo kale kaa caawin karaan go'aansashada haddii aad u qalanto waxa loogu yeero hanaanka hanaanka 'degdega ah', kaasoo ka dhigan in degdeg dib u eegis loogu samayn doono sababo la xariira caafimaadkaaga ama sugnaantaada oo khatar ku jira. Waxaad sidoo kale u fasixi kartaa hal qof inuu ku matalo, uuna ku jiro dhakhtarkaaga ama qareenkaaga daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha. Nidaamkaaga Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu waa inuu ku siiyaa caawimaad macquul ah oo ku aadan buuxinta foomamka iyo talaabooyinka kale ee la xariira cabashada ama racfaanka. Caawimaadan waxaa kamid ah, laakiin kuma koobna, inuu ku siiyo adeegyada turjumaanka iyo lambaro aad lacag la'aan ku wacayso oo leh adeegyada TTY/TDD iyo tayada turjumaanka.

Si lagaaga caawiyo gudbinta cabasho la xariirta adeegyada guryaha la dagan yahay, waxaad wici kartaa Barnaamijka Qareennada Bukaanka ee Adeegga Qoysaska Yuhuuda ah (JFS) ood ka wacayso (858) 637-3210.

Si aad u hesho caawimaad ku aadan gudbinta cabasho la xariirta adeegyada bukaan socodka ama adeegyo kasta oo kale oo la xariira xanuunka isticmaalka maandooriyaha, waxaad wici kartaa Xarunta U qareemida Waxbarashada iyo U doodista Caafimaadka Macaamiisha (CCHEA) oo aad ka wacayso laynka bilaashka lagu waco (877) 734-3258.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Ka waran Haddii aan U baahan Nahay Caawimaad ku aadan Xalinta Caqabad iga Haysata Caymiskayga Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal Laakiin aanan Doonayn inaan Gudbiyo Cabasho ama Racfaan?

Waxaad caawimaad ka heli kartaa Gobalka haddii aad dhibaato ku qabto dadka saxda ah ee degmada si ay kaaga caawiyaan helitaanka qaabka aad ku adeegsanayso nidaamka.

Waxaad la xariiri kartaa Waaxda Adeegyada Daryeelka caafimaadka, Xafiiska Dhex-dhexaadiyaha, Isniinta ilaa Jimcada, 8 a.m. ilaa 5 p.m. (marka laga reebo maalmaha fasaxa), khadka taleefanka **888-452-8609** ama ciwanaka iimeelka MMCDOmbudsmanOffice@dhcs.ca.gov.

Fadlan ogoow: Fariimaha iimeelka ayaan ahayn kuwo qarsoodi ah. Waa inaadan soo raacin xogtaada gaarka ah fariinta iimeelka.

Waxaad heli kartaa caawimaad sharci oo bilaash aad uga helayso xafiiska caawimaada sharciga (legal aid) ee deegaankaaga ama kooxaha kale. Waxaad wax ka waydiin kartaa xuquuqdaada dhageysiga ama caawimaada sharci ee bilaashka ah oo aad ka helayso Waaxda Su'aalaha iyo Jawabata Dadwaynaha:

Wac Laynka Bilaashka ah: 1-800-952-5253

Haddii aad tahay dhagool ama adeegsato TDD, wac: **1-800-952-8349**



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

HANAANKA CABASHADA

Waa Maxay Cabasho?

Cabasho waa muujinta diidmo ku aadan wax quseeya adeegyadaada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha kuwaasoo aan ahayn mid kamid ah caqabadaha lagu xaliyo hanaannada racfaanka iyo Dhageysiga Gobalka.

Hanaanka cabashada ayaa:

- Loo maraa hanaan fudud, oo si fudud loo fahmaayo oo kuu sahlaaya inaad cabasho kusoo gudbiyo hadal ahaan ama qoraal ahaan.
- Looma adeegsan karo wax kaa dhan ah adigga ama dhakhtarkaaga sinaba.
- Kuu sahlaaya inaad qof kale u wakiilato inuu wakiil kaa noqdo, uuna ku jiro dhakhtar ama qareenka. Haddii aad u wakiilato qof kale inuu ku matalo, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa kaa codsan kara inaad saxiixdo foom cadaynaaya in caymisku siiyo xogta qofkaas.
- Xaqiijinaaya in dadka gaaraaya go'aanka ay yihiin kuwo khibrad u leh aysana kasoo qaybgelin dib u eegis hore ama go'aan horey looga gaaray racfaanka.
- Aqoonsanaaya doorarkaaga iyo waajibaadka adiga, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada iyo dhakhtarka.
- Xal u keenaaya cabashada mudada loo cayimay gudaheed.

Goorma ayaan Gudbin Karaa Cabasho?

Waxaad cabasho u gudbin kartaa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada xili kasta haddii aadan ku qancin adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee aad ka hesho caymiska Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ama arin kale oo qusaysa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Sidee ayaan Ku Gudbin karaa Cabasho?

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa ku siin doona boqshado ciwaanka lagusoo qorey oo la dhigaayo dhammaan xarumaha adeeg bixiyaasha si aad boostada ugu dirto cabashada. Cabashada waxaa lagu gudbin karaa hadal ahaan ama qoraal ahaan. Cabashooyinka afka laga sheego ayaan u baahnayn inaad soo raaciso qoraal.

Si lagaaga caawiyo gudbinta cabashooyin la xariira adeegyada guryaha la dagan yahay, waxaad wici kartaa Barnaamijka Qareennada Bukaanka ee Adeegga Qoysaska Yuhuuda ah (JFS) ood ka wacayso (858) 637-3210.

Si aad u hesho caawimaad ku aadan gudbinta cabasho la xariirta adeegyada bukaan socodka ama adeegyo kasta oo kale oo la xariira xanuunka isticmaalka maandooriyaha, waxaad wici kartaa Xarunta U qareemida Waxbarashada iyo U doodista Caafimaadka Macaamiisha (CCHEA) oo aad ka wacayso laynka bilaashka lagu waco (877) 734-3258.

Sidee ayaan Ku Ogaanayaa Haddii Degmadu Ay Heshay Cabashadayda?

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa laga doonayaa inuu kuu sheego inay heleen cabashadaada ayagoo kuu soo diraaya xaqiijin qoraal ah.

Goorma Ayaa Cabashadayda Go'aan laga Gaaryaaa?

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadaada waa inuu go'aan ka gaaro cabashadaada 90 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda aad



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

gudbisay cabashadaada. Jadwalka ayaa la kordhin karaa 14 maalmood haddii aad codsato muddo kordhin, ama haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal aamisan yahay in loo baahan yahay xog dheeri ah ama in dib u dhigista ay dantaadu ku jirto. Tusaalaha marka dib u dhigistu noqon karto maskalaxadaada waa marka degmadu aaminsan tahay in ay awoodi karto inay xal u hesho cabashadaada haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal la siiyo waqti dheeri ah oo uu xog dheeri ah kaaga helo adiga ama dadka kale ee ay qusayso.

Sidee Ayaan Ku Ogaanayaa Haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee Degmadu Uu Go'aan Ka Gaaray Cabashadayda?

Marka go'aan laga gaaro cabashadaada, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa kuu sheegi doona adiga ama wakiilkaaga qaab qoraalka ah go'aanka uu gaaray. Haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmadu ku fashimo inuu kuu sheego adiga ama dhinacyo kasta oo ay qusayso go'aanka laga gaaray cabashada waqtiga ku haboon, markaas Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa ku siin doona Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada asagoo kuu sheegaaya xaq aad u leedahay inaad codsato Dhageysiga Gobalka. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmadaada ayaa laga doonayaa inuu ku siiyo Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada maalinta waqtiga la cayimay ku egyahay.

Ma Jiraa Waqti U Cayiman Gudbinta Cabashada?

Waxaad gudbin karta acabasho xiliga aad doonto.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

HANAANKA RACFAANKA (HEERKA CAADIGA AH IYO KAN BOOBSIISKA AH)

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa masuul ka ah inuu kuu ogolaato inaad racfaan ka qaadata go'aanka laga gaaro adeegyadaada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee uu gaaray caymiska ama dhakhaatiirtaada ee aadan aqbalin. Waxaa jira labo qaab oo aad ku codsan karto dib u eegis. Hal qaab waa adeegsiga hanaanka racfaannada ee caadiga ah. Qaabka labaad waa inaad adeegsato hanaanka racfaannada boobsiiska ah. Labadaan nooc ee racfaanka ayaa iskumid ahl hase yeeshee, waxaa jira shuruudo gaar ah oo aad ugu qalmayso racfaan boobsiis ah. Shuruudaha gaarka ah ayaa hoos lagu sharxay.

Waa maxay Racfaanka Caadiga ah?

Racfaanka caadiga ah waa codsiga dib u eegis lagu sameynaayo dhibaato kaa haysata caymiska ama dhakhtarkaaga kaasoo ay ku jirana diidmada ama isbadellada lagu samaynaayo adeegyada aad isleedahay waad u baahan tahay. Haddii aad codsato racfaan caadi ah, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee dehmada ayaa qaadan kara ilaa 30 maalmood si uu dib u eegis u sameeyo. Haddii aad isleedahay sugista 30 maalmood waxay khatar gelinaysaa caafimaadkaaga, waa inaad codsataa "racfaan boobsiis ah."

Hanaanka racfaannada caadiga ah ayaa:

- Kuu sahlaaya inaad cabasho kusoo gudbiso si toos ah khadka taleefanka, ama qoraal ahaan.
- Xaqiijinaaya in racfaanka aan wax kaa dhan ah loo adeegsan doonin adiga ama dhakhtarkaaga sinaba.
- Kuu sahlaaya inaad qof kale u wakiilato inuu wakiil kaa noqdo, uuna ku jiro dhakhtar. Haddii aad u wakiilato qof kale inuu ku matalo, caymiska ayaa kaa codsan kara inaad saxiixdo foom cadaynaaya in caymisku siiyo qofka qofkaas.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Xaqiijinaaya in lagu sii wado gunnooyinkaaga marka aad codsato racfaanka waqtiga loo cayimay gudihiis, kaasoo ah 10 maalmood laga bilaabo taariikhda Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada lagusoo diray boosto ama toos laguugu dhiibay. Qasab maaha inaad bixiso qarashka adeegyada laguusii wadaayo inta racfaanka aan wali go'aan laga gaarin. Haddii aad codsato in lagu sii wado gunnada, go'aanka kama danbaysta ah ee racfaankuna xaqiijiyo go'aanka hoos u dhigista ama joojinta adeegga aad hesho, waxaa lagaa doonayaa inaad bixiso qarashka adeegyada la baxshay inta racfaanku taagan yahay.
- Xaqiijinaaya in dadka gaaraaya go'aanka ay yihiin kuwo khibrad u leh aysana kasoo qaybgelin dib u eegis heerar hore ama go'aan horey looga gaaray racfaanka.
- Wuxuu kuu sahlayaa adiga ama wakiilkaaga inuu qiimeeyo galka kiiskaaga, uuna ku jiro diiwaankaaga caafimaadka, iyo dukumiintiyo kale oo kasta ama diiwaannada la tixgelinaayo inta lagu jiro hanaanka racfaanka, kahor iyo inta lagu jiro racfaanka.
- Wuxuu kuu sahlayaa inaad hesho fursad macquul ah oo aad ku keento cadaynta iyo eedaymaha xaqiiqada ama sharciga, si toos ah ama qoraal ahaan.
- Wuxuu kuu sahlayaa adiga, wakiilkaaga, ama wakiilka sharciga ah ee guriga macmiilka dhintay in lagu daro si ay qayb uga noqdaan racfaankaaga.
- Wuxuu kuu sheegayaa in racfaankaaga la helay asagoo kuusoo diraaya qoraal xaqiijin ah.
- Wuxuu kuu sheegayaa xaq aad u leedahay inaad codsato Dhageysiga Gobalka, kadib marka la dhameeyo hanaanka racfaanka.

Goorma ayaan Gudbin karaa Racfaan?

Waxaad racfaan u gudbin kartaa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada:



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Haddii degmadaada ama mid kamid ah dhakhaatiirta qandaraaska kula jirta degmada uu go'aansado in aadan u qalmin helista wax kamid ah adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee Medi-Cal sabab la xariirta inaad buuxin shuruudaha muhiimada caafimaadka.
- Haddii dhakhtarkaagu uu aaminsan yahay inaad u baahan tahay adeegga daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha uuna ka codsaday caymiska degmada inuu ogolaado, laakiin caymiska degmadu uusan aqbalin ama diiday codsiga dhakhtarkaaga, ama uu badelo nooca ama heerka adeegga.
- Haddii dhakhtarkaagu uu ka codsato Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmada ogolaansho, laakiin caymiska degmadu uu u baahan yahay xog dheeri ah si uu u gaaro go'aanka uusana ku dhamaystirin hanaanka ogolaanshaha waqtigii la rabay.
- Haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmadaadu uusan ku siin adeegyada ayadoo la raacaayo jadwalka Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu dejisay.
- Haddii Aadan aaminsanayn in Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmadu uu ku siinaayo adeegyada xili ku haboon si loo daboolo baahiyahaaga.
- Haddii aan cabashadaada, racfaanka, ama racfaanka boobsiiska ah aan xal looga gaarin waqtigii loo cayimay.
- Haddii diga iyo dhakhtarkaagu iinaan ku heshiin adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee aad u baahan tahay.

Sidee ayaan u Gudbin karaa Racfaan?

Caymiska degmada ayaa ku siin doona boqshadu ciwaankoodu ku qoran yahay oo aad ka helayso dhammaan xarumaha dhakhaatiirta si aad boostada ugusoo dirto racfaankaaga. Racfaannada waxaa lagu gudbin karaa hadal ahaan ama qoraal ahaan.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Si lagaaga caawiyo gudbinta cabasho la xariirta adeegyada guryaha la dagan yahay, waxaad wici kartaa Barnaamijka Qareennada Bukaanka ee Adeegga Qoysaska Yuhuuda ah (JFS) ood ka wacayso (858) 637-3210

Si aad u hesho caawimaad ku aadan gudbinta cabasho la xariirta adeegyada bukaan socodka ama adeegyo kasta oo kale oo la xariira xanuunka isticmaalka maandooriyaha, waxaad wici kartaa Xarunta U qareemida Waxbarashada iyo U doodista Caafimaadka Macaamiisha (CCEA) oo aad ka wacayso laynka bilaashka lagu waco (877) 734-3258.

Sidee Ayaa Ku Ogaanayaa In Racfaankayga Go'aan Laga Gaaray?

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmada ayaa ugu sheegi doona adiga ama wakiilkaaga qaab qoraal ah go'aanka uu ka gaaray racfaankaaga. Ogeysiiska waxaa ku qornaan doona xogta soo socota:

- Natijjooyinka hanaanka xalinta racfaanka.
- Taariikhda go'aanka racfaanka lasoo saaray.
- Haddii racfaankaaga aan si buuxda loogu go'aamin sidii aad rabtay, ogeysiiska waxaa sidoo kale ku jiri doonta xog ku aadan xaq aad u leedahay Dhageysiga Gobalka iyo hanaanka gudbinta Dhageysiga Gobalka.

Ma Jiraa Waqti U Cayiman Gudbinta Racfaanka?

Waa inaad kusoo gudbisaa racfaanka 60 maalmood gudahood kadib marka aad hesho Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada. Xasuusnoow inaad markasta heli karin Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada. Ma jiraan waqtiyo u cayiman gudbinta racfaanka marka aadan helin Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada; marka waxaad gudbin kartaa racfaanka noocaan ah marka aad doonto.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Goorma Ayaa go'aan Laga Gaarayaa Racfaankayga?

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada waa inuu go'aan ka gaaraa racfaankaaga 30 maalmood gudahood laga bilaabo marka Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu helo codsigaaga racfaanka. Jadwalka ayaa la kordhin karaa 14 maalmood haddii aad codsato muddo kordhin, ama haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal aamisan yahay in loo baahan yahay xog dheeri ah ama in dib u dhigista ay dantaadu ku jirto. Tusaalaha marka dib u dhigistu yahay maskalaxadaada waa marka degmadu aaminsan tahay in ay awoodi karto inay xal u hesho racfaankaaga haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal la siiyo waqti dheeri ah oo uu xog dheeri ah kaaga helo adiga ama dhakhtarkaaga.

Ka Waran Haddii Aanan Sugi Karin 30 Maalmood Go'aanka Racfaankayga?

Hanaanka racfaanka ayaa la boobsiin karaa haddii uu u qalmo hanaanka racfaannada boobsiiska ah.

Waa maxay Racfaanka Boobsiiska ah?

Racfaanka boobsiiska ah waa qaab degdeg ah oo go'aan looga gaaro racfaan. Hanaanka racfaanka ayaa raaca isla nidaamka hanaanka racfaannada caadiga ah. Hase yeeshee,

- Racfaankaagu waa inuu buuxshaa shuruudo gaar ah.
- Hanaanka racfaannada boobsiiska ah ayaa sidoo kale raacaaya waqtiyo gaar ah oo cayiman kuwaasoo ka duwan kan racfaanka caadiga ah.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Waxaad gudbin kartaa codsiga afka ah ee racfaanka boobsiiska ah. Qasab maaha inaad codsigaaga racfaanka degdega ah kusoo gudbiso qoraal ahaan.

Goorma ayaan Gudbin Karaa Racfaan Boobsiis ah?

Haddii aad aaminsan tahay in sugista 30 maalmood si loo gaaro go'aanka caadiga ah ee racfaanka ay khatar gelinayso noloshaada, caafimaadka, ama awooda helista, xakamaynta ama joogtaynta shaqada buuxda, waxaad codsan kartaa in racfaanka degdeg go'aan looga gaaro. Haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada uu aqbalo in racfaankaagu buuxshay shuruudaha racfaanka boobsiiska ah, degmadaada ayaa xalin doonta racfaankaaga degdega ah 72 saac gudahood kadib marka Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu helo racfaanka.

Jadwalka ayaa la kordhin karaa 14 maalmood haddii aad codsato muddo kordhin, ama haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal muujiyo in loo baahan yahay xog dheeri ah ama in dib u dhigista ay dantaadu ku jirto. Haddii Nidaamkaaga Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada uu kordhiyo waqtiga, caymiska ayaa ku siin doona sharaxaad qoraal ah oo sheegaysa sababta mudada loo kordhiyay.

Haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadu uu go'aansho in racfaankaagu uusan u qalmin racfaanka boobsiiska ah, Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada waa inuu sameeyaa dedaallada ku haboon si uu kuu siiyo ogeysiis degdeg ah oo afka ah wuxuuna ogeysiis qoraal ah kuusoo dirayaa 2 maalmood gudahood asagoo kuu sheegaaya sababta go'aanka uu u gaaray. Racfaankaaga ayaa raaci doona jadwalka caadiga ah ee racfaanka ee horey loogu cadeeyay qaybtaan. Haddii aadan aqbalin go'aanka caymiska degmada ee ah in



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

aan racfaankaagu buuxin shuruudaha racfaanka boobsiiska ah, waxaad gudbin kartaa cabasho.

Marka Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmadaada uu xaliyo racfaankaaga degdega ah, caymiska ayaa u sheegi doona adiga iyo dhammaan dhinacyada ay qusayso go'aanka qaab hadal ah iyo qaab qoraal ah.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

HANAANKA DHAGEYSIGA GOBALKA

Waa Maxay Dhageysiga Gobalku?

Dhageysiga Gobalku waa dib u eegis madax banaan, oo ay samayso Waaxda Adeegyada Bulshada ee California, si loo xaqiijiyo inaad hesho adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee aad xaq u leedahay inuu ku siiyo barnaamijka Medi-Cal. Waxaad sidoo kale booqan kartaa webseedka Waaxda Adeegyada Bulshada ee California oo ah <https://www.cdss.ca.gov/hearing-requests> si aad u hesho xog dheeraad ah.

Waa Maxay Xaquuqdayda Dhageysiga Gobalka?

Waxaad xaq u leedahay:

- Inuu kiiskaaga la horgeeyo Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (oo sidoo kale loo yaqaano Dhagaysiga Gobalka).
- In xog lagaa siiyo sida aad u codsan karto Dhageysiga Gobalka.
- In xog lagaa siiyo xeerarka maamulaaya matalaada matalaada aad ku helayso Dhageysiga Gobalka.
- In lagu sii wado gunnooyinka marka aad codsato inta lagu jiro hawsha Dhageysiga Gobalka haddii aad codsato Dhageysiga Gobalka Inta lagu jiro waqtiga loo cayimay.

Goorma ayaan Gudbin karaa Dhageysiga Gobalka?

Goorta aad Gudbin karto Dhageysiga Gobalka:

- Haddii aad dhamaystirtay hanaanka racfaanka ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Haddii degmadaada ama mid kamid ah dhakhaatiirta qandaraaska kula jirta degmada uu go'aansado in aadan u qalmin helista wax kamid ah adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee Medi-Cal sabab la xariirta inaad buuxin shuruudaha muhiimada caafimaadka.
- Haddii dhakhtarkaagu uu aaminsan yahay inaad u baahan tahay adeegga daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha uuna ka codsaday Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmada inuu ogolaado, laakiin Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmadu uusan aqbalin ama diiday codsiga dhakhtarkaaga, ama uu badeelo nooca ama heerka adeegga.
- Haddii dhakhtarkaagu uu ka codsato Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmada ogolaansho, laakiin caymiska degmadu uu u baahan yahay xog dheeri ah si uu u gaaro go'aanka uusana ku dhamaystirin hanaanka ogolaanshaha waqtigii la rabay.
- Haddii Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmadaadu uusan ku siin adeegyada ayadoo la raacaayo jadwalka degmadu dejisay.
- Haddii Aadan aaminsanayn in Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmadu uu ku siinaayo adeegyada xili ku haboon si loo daboolo baahiyahaaga.
- Haddii aan cabashadaada, racfaanka, ama racfaanka boobsiiska ah aan xal looga gaarin waqtigii loo cayimay.
- Haddii diga iyo dhakhtarkaagu iinaan ku heshiin adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee aad u baahan tahay.
- Haddii aan cabashadaada, racfaanka, ama racfaanka boobsiiska ah aan xal looga gaarin waqtigii loo cayimay.

Sidee ayaan U Codsanayaa Dhageysiga Gobalka?

Waxaad ka codsan kartaa Dhageysiga Cadaalada ah ee Gobalka:



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Oonlaynka oo ah: <https://acms.dss.ca.gov/acms/login.request.do>
- Qoraal ahaan: Codsigaaga u dir waaxda faya dhawrka ee degmada oo aad ugu direyso ciwaanka ku qoran Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada, ama fakiska ama boostada ugu dir:

California Department of Social Services State Hearings Division
P.O. Box 944243, Mail Station 9-17-37
Sacramento, CA 94244-2430

Ama fakiska ugu dir **916-651-5210** ama **916-651-2789**.

Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa Dhageysiga Gobalka ama Dhageysiga Gobalka ee boobsiiska ah:

- **Taleefanka**: Ka wac Waaxda Dhageysiga Gobalka, laynka bilaashka ah, oo ah **800-743-8525** ama **855-795-0634**, ama ka wac laynka Su'aalaha iyo Jawaabaha Dadwaynaha, ee bilaashka ah, oo ah **800-952-5253** ama TDD oo ah **800-952-8349**.

Ma Jiraa Waqti U cayiman Dhageysiga Gobalka?

Waxaad haysataa keliya 120 maalmood gudahood si aad u codsato Dhageysiga Gobalka. Mudada 120 maalmood ayaa bilaabanaysa midkood maalinta ka danbaysa marka Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmadu uu toos kuu siiyo ogeysiiska go'aanka racfaanka ama maalinta ka danbaysay marka uu ogeysiiska racfaanka ee caymiska degmadu kugusoo gaaro boostada.

Haddii aadan helin Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada, waxaad gudbin kartaa Dhageysiga Cadaalada ah ee Gobalka markii aad doonto.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Miyaan sii Wadan karaa Adeegyada Inta aan Sugaayo Go'aanka Dhageysiga Gobalka?

Haa, haddii aad hadda qaadata daawayn aadna doonayso inaad sii wado daawaynta inta aad racfaanka qaadanayso, waa inaad codsataa Dhageysiga Gobalka 10 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska go'aanka racfaanka boostada lagu diray ama lagu keenay MAA kahor tariikhda Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada uu sheego in adeegyada la joojiyay ama la yareeyay. Marka aad codsato Dhageysiga Gobalka, waa inaad sheegtaa inaad doonayso in adeegyada lagu sii wadato helitaanka daawayntaada. Waxaa intaas dheer, qasab maaha inaad bixiso qarashka adeegyada aad heshay intii la sugaayay go'aanka Dhageysiga Gobalka.

Haddii aad codsato in lagu sii wado gunnada, go'aanka kama danbaysta ah ee Dhageysiga Gobalkuna xaqiijiyo go'aanka hoos u dhigista ama joojinta adeegga aad hesho, waxaa lagaa doonayaa inaad bixiso qarashka adeegyada la baxshay inta Dhageysiga Gobalku socdo.

Goorma ayaa go'aan Laga Gaarayaa Dhageysigayga Gobalka?

Kadib marka aad codsato Dhageysiga Gobalka, waxay qaadan kartaa ilaa 90 maalmood si go'aan looga gaaro kiiskaaga laguuna soo diro jawaab.

Ma heli karaa Go'aanka Dhageysiga Gobalka oo Degdeg ah?

Haddii aad aaminsan tahay in sugista mudadaas dheer ay khatar ku tahay caafimaadkaaga, waxaad awoodi kartaa inaad codsato in jawaabta lagugu siiyo sadex maalmood gudahood. Ka codso dhakhtarkaaga ama adeeg bixiyaha kale inuu kuu qoro



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

waraaq. Sidoo kale adiga qudhaada ayaa qoran kara waraaqda. Waraaqdu waa inay sharaxdaa si faahfaahsan sida sugitaanka muddo dhan 90 maalmood si kiiskaaga go'aan looga gaaro ay khatar wayn ugu tahay noloshaada, caafimaadkaaga ama awoodaada haysashada, joogtayta, ama haysashada shaqada maskaxda ee buuxda. Kadib, xaqiiji inaad codsato "dhageysi degdeg ah" waraaqdana soo raaci codsigaaga dhageysiga.

Waxaad codsan kartaa Dhageysiga Gobalka ee boobsiis ah (degdeg ah) haddii aad aaminsan tahay in mudada 90 maalmood ah ay dhobaatooyin daran u keenayso caafimaadkaaga, ayna ku jiraan dhibaatooyinka dhanka awoodaada helitaanka, joogtaynta, ama soo ceshashada shaqooyinka muhiimka ah ee nolosha. Waaxda Adeegyada Bulshada, Laanta Dhageysiga Gobalka, ayaa akhrin doonta codsigaaga Dhageysiga Gobalka ee degdega ah kadina go'aaminaysa haddii aad u qalanto. Haddii la aqbalo codsigaaga dhageysiga degdega ah, dhageysiga ayaa la qaban doonaa, kadibna go'aanka dhageysiga ayaa lasoo saari doonaa 3 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood laga bilaabo taariikhda ay codsigaaga heshay Laanta Dhageysiga Gobalka.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

XOGTA MUHIIMKA AH EE KU SAABSAN BARNAAMIJKA MEDI-CAL EE GOBALKA CALIFORNIA

Qofkee heli kara Medi-Cal?

Waxaad u qalmi kartaa Medi-Cal haddii aad ku jirto mid kamid ah kooxahaan:

- aad jirtaajirto 65 sano, ama kasii wayn
- Kayar 21 sano jir
- Qof wayn, oo u dhexeeya 21 iyo 65 sano jir marka laga eego u qalmida caymiska
- Indhool ama naafo
- Uur leh
- Qaxootiyaasha qaar, ama soo galootiga Cuba/Haiti
- Aad adeegyada ku hesho xarunta kalkaalinta
- Dadka ka yar 26 sano, ama ka wayn 50 sano jjir ayadoo aan laga eegayn xaaladaha soo galootiga

Waa inaad ku nooshahay California si aad ugu qalanto Medi-Cal. Wac ama booqo xafiiska adeegyada bulshada ee deegaankaaga si aad uga codsato codsiga Medi-Cal, ama kalasoo bax barta interneedka oo ah

<https://www.dhcs.ca.gov/services/medi-cal/Pages/ApplyforMedi-Cal.aspx>.

Sidee ayay U dhiibayaa Qarashka Medi-Cal?

Waxaa lagaa rabi karaa qarashka Medi-Cal ayadoo ku xiran cadadka lacagta aad hesho ama aad shaqaysato bil kasta.

- Haddii dakhligaagu ka hooseeyo xadiyada Medi-Cal ee tirada qoyskaaga, lagaama rabo qarashka adeegyada Medi-Cal.
- Haddii dakhligaagu ka badan yahay xadiyada Medi-Cal ee tirada qoyska, waa inaad bixisaa qaar kamid ah lacagta caafimaadkaaga ama adeegyada



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha. Cadadka aad dhiibayso waxaa la dhahaa 'qaybtaada qarashka.' Marka aad dhiibto 'qaybtaada qarashka,' Medi-Cal ayaa dhiibaysa inta kale ee qarashka caymisku daboolaaayo ee caafimaadka bishaas. Bilaha aadan gelin wax qarash caafimaad ah, lagaama rabo inaad lacag bixiso.

- Waxaa laga yaabaa inaad dhiibto 'qaybta caymiska' ee daawayn kasta oo aad ka hesho Medi-Cal. Tani waxay ka dhigan tahay inaad dhiibto cadadka aad jeebka ka dhiibayso mar kasta oo aad hesho adeegga daawaynta caafimaadka ama xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ama lagu qoro daawo iyo qaybta caymiska haddii aad gasho qolka xaalada degdega ah ee isbitaalka ee adeegyadaada caadiga ah.

Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona haddii aad u baahan tahay inaad bixiso qaynta lacagta.

Gaadiid Ma la Heli karaA?

Haddii aad dhibaato ku qabto helista balamahaaga caafimaadka ama balamaha daawada khamriga iyo daroogada, barnaamijka Medi-Cal ayaa kaa caawin kara gaadiidka.

Gaadiidka aan ahayn kan xaaladaha degdega ah iyo gaadiidka aan la xariirin caafimaadka ayay heli karaan macaamiisha Medi-Cal ee aan awoodin inay inay gaadiid iskood u helaan qabana baahi caafimaad oo ay helaan adeegyada ay Medi-Cal daboosho. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo gaadiidka, la xariir caymiska daryeelkaaga maaraysan si aad u hesho xog iyo caawimaad.

Haddii aad haysato Medi-Cal laakiin aadan ka diiwaan gashanayn daryeelka maaraysan, aadna u baahan tahay gaadiidka aan ahayn kan caafimaadka, waxaad la xariiri kartaa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

degmadaada si lagu caawiyo. Marka aad la xariirto shirkada gaadiidka, waxay ku waydiin doonaan xog ku saabsan taariikhda ayo waqtiga balantaada. Haddii aad u baahan tahay gaadiid aan ahayn kan xaaladaha degdega ah ee caafimaadka, dhakhtarkaaga ayaa kuu qori kara gaadiidka aan ahayn kan xaaladaha degdega ah ee caafimaadka kuguna xiri kara shirkada gaadiidka si laguugu diyaarsho gaariga ku qaadi lahaa si uu kuu geeyo kaagana soo qaado goobaha balantaada.

Xog Dheeriga ah ee Gaarka u ah Degmada

Haddii aad u baahan tahay gaadiidka aan ahayn kan caafimaadka, liiska adeeg bixiyaasha gaadiidka aan ahayn kan caafimaadka ayaa laga heli karaa <https://www.dhcs.ca.gov/services/medi-cal/Documents/List-of-Approved-Nonmedical-Transportation-Providers.pdf>



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

DARDAARANKA HORE

Waa maxay Dardaaranka Hore loo sii Qoray?

Waxaad xaq u leedahay inaad lahaato dardaaranka hore. Dardaaranka hore waa tilmaamo qoran oo ku aadan daryeelkaaga caafimaadka kaasoo lagu aqoonsan yahay sharciga California. Waxaa ku jira xog sheegaysa sida aad doonayso in daryeelka caafimaadka lagu siiyo ama sheegaysa noocyada go'aannada aad doonayso in la gaaro, haddii ama marka aadan awoodin inaad naftaada u hadasho. Waxaad mararka qaar maqli kartaa dardaaranka hore oo lagu qeexaayo dardaaranka nool ama awooda masuuliyada joogtada ah.

Sharciga California ayaa qeexaaya dardaaranka hore inuu yahay midkood tilmaanta caafimaadka ee hadalka ah ama qoraalka ah ee gaarka ah ama awooda qareenka (dukumiinti qoran oo qofka u fasaxaysa inuu go'aano kuu gaaro). Dhammaan degmooyinka Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa laga doonayaa inay lahaadaan xeerarka dardaaranka horey Loo sii qoray oo diyaarsan. Degmadaada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa laga doonayaa inay bixiso xogta qoran ee xeerarka dardaaranka horey Loo sii qoray ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal iyo sharaxaada sharciga gobalka, haddii laga codsado xogta. Haddii aad doonayso inaad codsato xog, waa inaad wacdaa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal degmada si aad u hesho xog dheeraad ah.

Dardaaranka hore ayaa loo sameeyay inuu u sahlo dadka inay maamulaan daawayntooda, gaar ahaanna marka aysan awoodin inay baxshaan amarada la xariira daryeelkooda shaqsiga ah. Waa dukumiinti sharci ah oo u sahlaysa dadka inay sheegaan, xili hore, waxa ay doonayaan in la sameeyo haddii aysan awoodin inay gaaraan go'aannada daryeelka caafimaadka si iskood ah. Tan waxaa ku jiri kara



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah

https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

waxyaabaha sida xaqa aqbalaada ama diidista daawaynta caafimaad, qaliinka, ama inay gaaraan dookhyada kale ee daryeelka caafimaadka. Gudah California, dardaaranka hore ayaa ka kooban labo qaybood:

- Magacaabistaada wakiil (qof) gaaraaya go'aannada la xariira daryeelkaaga caafimaad; iyo
- Tilmaamahaaga gaarka ah ee daryeelka caafimaadka

Waxaad ka helayso foomka dardaaranka horey Loo sii qoray Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ama oonlaynka. Gudaha California, waxaad xaq u leedahay inaad tilmaamaha dardaaranka hore siiso dhammaan dhakhaatiirta daryeelka caafimaadka. Sidoo kale waxaad xaq u leedahay inaad badesho ama joojiso dardaarankaaga hore marka aad doonto.

Haddii aad su'aalo ka qabto sharciga California ee la xariira shuruudaha dardaaranka hore, waxaad waraaq u diri kartaa:

California Department of Justice
Attn: Public Inquiry Unit,
P. O. Box 944255
Sacramento, CA 94244-2550

Xog Dheeriga ah ee Gaarka u ah Degmada

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan Dardaaranka hore Loo sii Qoray, waxaad booqan kartaa xarunta dhakhtar kasta oo baxsha daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha oo qandaraas kula jira Ismaamulka San Diego.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADKA MACMIILKA

Waa maxay Xuquuqdayda marka Aan ahay Macmiilka Adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal?

Marka aad tahay qof u qalma Medi-Cal kuna nool degmo bixisa Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal, waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee caafimaad ahaan muhiimka ah oo ay bixiso degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal. Waxaad xaq u leedahay:

- In lagugula dhaqmo si xushmad leh, lagu siiyo tixgelinta aad u qalanto ee xaquuqdaada sirta iyo baahida ilaalinta sita xogtaada caafimaadka.
- Inaad hesho xog ku saabsan dookhyada daawaynta iyo dookhyada kale, oo lagugu siinaayo qaab ku haboon xaalada macmiilka iyo awooda fahanka.
- Inaad ka qaybgasho go'aannada la xariira daryeelkaaga xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha, uuna ku jiro xaq aad u leedahay inaad diido daawada.
- Waa inaad heshaa daryeelka waqtiga ku haboon, ayna ku jiraan inuu adeegyada baxsho 24 saac maalintii, 7 maalmood asbuucii, marka ay caafimaad ahaan muhiim tahay si loo daaweeyo xanuunka xaalad degdeg ah ama xaalad degdeg ah ama dhibaato.
- Inaad hesho xogta ku qoran buug-gacmeedkaan ee la xarirta adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha ee uu daboolo Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee Degmada, waajibaadka kale ee degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal, iyo xuquuqdaada sida halkaan lagu sheegay.
- In la difaaco sirta xogtaada caafimaadka.
- Inaad codsato aadna hesho nuqulka diiwaanadaada caafimaadka, aadna codsato in la badelo ama la saxo, haddii loo baahdo.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Inaad hesho xogta qoran oo lagu baxsho qaabab kale (ayna ku jirana farta Indhoolka, far qaawayn, iyo qaab cod ah) marka aad codsato iyo waqtiga loogu talagalay ee ku haboon qaabka aad codsatay.
- Inaad hesho xogta qoraalka ah oo ku baxaysa luuqadaha ay adeegsadaan ugu yaraan shan boqolkiiba ama 3,000 kamid ah macaamiisha degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal, hadba kii yar.
- Inaad hesho adeegyada turjumaanka afka ee luuqada aad rabto.
- Inaad ka hesho adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha oo uu baxsho Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada kaas oo raacaaya shuruudaha heshiiska kala dhexeeya gobalka ee dhinacyada helitaanka adeegyada, xaqiijinta tayada iyo adeegyada ku filan, isku dubaridka iyo sii wadista daryeelka, iyo adeegyada caymiska iyo ogolaanshaha.
- Inaad hesho Adeegyada Ogolaanshaha Ilmaha, haddii aad tahay ilmo aan qaangaarin.
- Inaad hesho adeegyada caafimaad muhiimka ah ee ka baxsan shabakada caymiska ee aad hesho waqtiga ku haboon, haddii caymisku uusan lahayn shaqaale ama adeeg bixiye qandaraas kula jira oo adeegyada bixin kara. "Dhakhtar ka baxsan caymiska" waxaa laga wadaa dhakhtar aan kamid ahayn liiska dhakhaatiirta Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada. Caymiska degmadu waa inuu xaqiijiyaa inaad dhiibin wax qarash dheeri ah marka aad u tagto dhakhtar ka baxsan caymiska. Waxaad la xariiri kartaa adeegyada macaamiisha oo aad ka helayso [County to Insert Toll-Free Phone Number] si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku helayso adeegyada dhakhtar aan ku jirin caymiska.
- Inaad codsato fikir labaad oo uu baxsho dhakhtar xirfad caafimaad leh kana tirsan shabakada degmada, ama mid ka baxsan caymiska, ayadoo aan lagaa qaadin wax qarash ah.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Inaad gudbiso cabashooyin, midkood af ahaan ama qoraal ahaan, aadna ka gudbiso ururka ama daryeelka aad hesho.
- Inaad codsato racfaan, midkood hadal ahaan ama qoraal ahaan, marka aad hesho Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada, ayna ku jirana xog ku saabsan xaaladaha racfaanka degdega ah la samayn karo.
- Inaad codsato dhagaysiga cadaalada ah ee Gobalka ee Medi-Cal, ayna ku jirto xogta ku saabsan xaaladaha Dhagaysiga Gobalka ee degdega ah suurageli karaan.
- Inaad xor ka ahaatid jajuub ama xanibaad kasta oo loo isticmaalayo hab lagu gaadhayo qasbid, edbin, hawl sahlasho ama aargoosasho.
- Inaad xor ka ahaato takoor la xariira ku dhaqanka xuquuqahaan ayadoo aan dhibaato ku imaanayn sida ay kuu dhaqmaan Degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal, adeeg bixiyaasha, iyo Gobalka.

Waa maxay Waajibaadkayga marka Aan ahay Macmiilka Adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal?

Marka aad tahay qof hela adeegyada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal, waxaad masuul ka tahay:

- Inaad si taxadar leh u akhrido agabka xogta aad ka hesho degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal. Xogtaan ayaa kaa caawin doonta inaad fahanto adeegyada aad heli karto iyo sida aad ku heli karto daawayn haddii aad u baahan tahay.
- Inaad uga qaybgasho daawaynta sida la mudeeyay. Waxaad heli doontaa natiijada ugu fiican haddii aad la shaqayso dhakhtarkaaga inta lagu jiro daawayntaada. Haddii aad doonayso inaad ka baaqato balan, wac dhakhtarkaaga ugu yaraan 24 saac kahor, kadibna dib u dhigo balanta maalin iyo waqti kale.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

- Marka waa inaad sidataa Aqoonsigaaga Medi-Cal (Degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal) iyo aqoonsi sawir leh marka aad daawaynta u timaado.
- U sheeg dhakhtarkaaga haddii aad u baahan tahay turjumaan kahor balantaada.
- U sheeg dhakhtarkaaga dhammaan walaacyadaada caafimaadka. Hadba intaad xog dhamaystiran uga sheegto dhakhtarkaaga baahiyaha aad qabto, ayay daawayntaadu sii guulaysanaysaa.
- Xaqiiji inaad waydiiso dhakhtarkaaga su'aalo kasta oo aad qabto. Aad ayay muhiim u tahay inaad si buuxda u fahanto xogta aad hesho inta lagu jiro daawayntaada.
- Inaad diyaar u tahay inaad xariir shaqo oo wanaagsan la yeelato dhakhtarka ku daawaynaaya.
- La xariir Degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan adeegyadaada ama haddii aad dhibaatooyin ku qabto dhakhtarkaaga oo aadan awoodin inaad xal u hesho.
- U sheeg dhakhtarkaaga iyo Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada haddii ay wax isbadello ah ku dhaceen xogtaada gaarka ah. Tan waxaa ku jira ciwaanka, lambarka taleefanka, iyo xog kasta oo caafimaad oo saamayn karta awoodaada ka qaybgalka daawaynta.
- Ula dhaqan shaqaalaha ku siinaaya daawaynta si qadarin iyo xushmad leh.
- Haddii aad ka shakido khiyaano ama khalad lagu kacaayo, u soo sheeg:
 - Waaxda Adeegyada Caafimaadka ayaa ka codsanaysa in qof kasta oo ka shakiya khiyaano, khasaaro, ama xadgudub ka dhacaaya Medi-Cal uu soo waco Laynka Kahortaga Khiyaannada ee DHCS Medi-Cal oo ah **1-800-822-6222**. Haddii aad dareento in arintaani xaalad degdeg ah tahay, fadlan wac **911** si lagu siiyo caawimaad degdeg ah. Wicitaanku waa lacag la'aan, qofka soo wacaaya ayaana qarar kara magaciisa.
 - Waxaad sidoo kale khiyaano ama xadgudub aad ka shakiday iimeelka ugu diri kartaa fraud@dhcs.ca.gov ama waxaad adeegsan kartaa foomka



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

oonlaynka ah oo ah <http://www.dhcs.ca.gov/individuals/Pages/StopMedi-CalFraud.aspx>.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

U WAREEGISTA CODISGA DARYEELKA

Goorma ayaan Codsan Karaa si aan u sii haysto dhakhtarkayga hadda iyo kii hore ee ka baxay caymiska?

- Kadib marka aad ku biirto degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal, waxaad codsan kartaa inaad adeeg kasii hesho dhakhtarkaaga ka baxay caymiska haddii:
 - U wareegista dhakhtar cusub ay khatar xun gelinayso caafimaadkaaga ama ay kordhinayso khatartaada isbitaal dhigista ama seexinta xarun; iyo
 - Aad daawayn ka helayso dhakhtarka ka baxsan caymiska kahor taariikhda aad u wareegaysay degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal.

Sidee ayaan u codsan Karaa dhakhtarkayga ka baxsan caymiska?

- Adiga, wakiiladaada sharciga ah, ama dhakhtarka hadda, ayaa codsi qoraal ah u diri kara degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal. Waxaad sidoo kale la xariiri kartaa Laynka Helitaanka iyo Masiibada (ACL) oo ah (888) 724-7240 (TTY: 711) si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan sida aad u codsanayso adeegyada dhakhtarka ka baxsan caymiska.
- Degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa kuusoo diraysa xaqiijinta helitaanka codsigaaga kadibna bilaabaysha shaqada codsigaaga sadex (3) maalmood oo kuwa shaqada ah.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Ka waran haddii aan sii wado inaan adeegyada ka helo dhakhtarka ka baxsan caymiska kadib marka aan u wareego degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal?

- Waxaad codsan kartaa kala guurka soo celinta adeegga ee codsiga daryeelka sodon (30) maalmood kadib marka aad hesho adeegyada ka yimaada dhakhtarka caymiska ka baxsan.

Maxay degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal u diidaysaa codsigayga wareejinta daryeelka?

- Degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa diidi karta codsigaaga sii wadashada adeegga dhakhtarkaaga hore, ee hadda ka baxay caymiska, haddii:
 - Degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ay diiwaan geliso ciladaha tayada daryeelka oo lagu arkay dhakhtarka.

Maxaa dhacaaya haddii codsigayga wareejinta daryeelka la diido?

- Haddii degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ay diido wareejinta daryeelkaaga, waxay:
 - Ku siinaysaa wargelin qoraal ah;
 - Waxay ku siinaysaa ugu yaraan hal dhakhtar kale oo caymiska ku jira kaasoo baxsha adeegyada iska heerka dhakhtarka ka baxsan caymiska; iyo
 - Kuu sheegaysaa xaq aad u leedahay gudbinta cabasho haddii aadan ku qancin diidmada.
- Haddii degmada nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ay ku siiso dookhyada badan ee dhakhtar ku jira caymiska aadana gaarin dookhaaga, markaas degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta onlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

Daawada Medi-Cal ayaa kuu gudbinaysa ama kuu dhiibaysa dhakhtar caymiska ku jira kuuna sheegaysa gudbinta ama magacaabida si qoraal ah.

Maxaa dhacaaya haddii codsigayga wareejinta daryeelka la ogolaado?

- Todobo (7) maalmood gudahood marka la ogolaado codsiga kala wareega daryeelka degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa ku siin doonta:
 - Ogolaanshaha codsiga;
 - Mudada kala wareega daryeelka;
 - Hanaanka loo maraayo wareejinta daryeelkaaga dhammaadka mudada daryeelkii hore; iyo
 - Xaqa aad u leedahay inaad xulato dhakhtar kale oo ku jira shabkada degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal xili kasta.

Muddo intee dhan ayuu qaadanayaa kala guurka daryeelkaygu?

- Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa kusoo afjaraaya dib u eegista kalaguurka codsigaaga daryeelka sodon (30) maalmood laga bilaabo taariikhda degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal hesho codsigaaga.

Maxaa dhacaaya dhammaadka mudada kala guurka daryeelkayga?

- Degmada Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ayaa kugu wargelinaysa qoraal ahaan sodon (30) maalmood gudahood kahor dhammaadka mudada kala guurka daryeelka si ay kuugu sheegto hanaanka la maraayo si



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html. Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.

daryeelkaaga loogu wareejiyo dhakhtar caymiska ku jira dhammaadka mudada kala guurka daryeelkaaga.



Wac laynka lacag la'aanta ah ee Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada oo aad ka helayso Laynka Helitaanka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) oo aad ka helayso (888) 724-7240 (TTY: 711) ama booqo barta oonlaynka ah https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html.

Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal ee degmada ayaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood asbuucii.